

GUULAHA DANWADAAG

SELF HELP GROUP
(2013 – 2019)



Unleashing human potential

GUULAHA DANWADAAG

SELF HELP GROUP
(2013 – 2019)



HANNAANKA DANWADAAG

SELF HELP GROUP APPROACH 2013-2019)

HORDHAC

Hannaanka Danwadaag waxa laga hirgaliyey Somaliland bishii sagaalaad 2013. Waxaana maalgalisa hayada Kindernoithilfe ee loo soo gaabiyo (KNH) waxa marti galisey hayada wadaniga ah ee NAFIS Network.

Hannaanka Danwadaag waa ururro laga dhex abaabulay bulshada inteeda haynta yar ama saboolka ah oo isku deegaan ah. Kuwaasi oo ka siman xagga nololaha, hoyga iyo dhaqaalaha oo la doonayo sidii loo horumarin lahaa. Danwadaag waxaa sameysan kara 15-20 xubnood, guud ahaan waa xubno isku meeqaam ah sida da'da, jinsiga, iyo dhaqaalaha, sidoo kale waa dad isku aragti ka ah dhinaca fikirka, wada-jirka iyo istaageerida dhexdooda ah.

Hannaanka waxa soo dhisay shaqaale dhan oo ah kow iyo sideetan ruux (81), 76 ka mid ihi ay ahaayeen dumar. Waxa si toos ah u fuliya kow iyo toban urur oo wadani ah (ADO, BVO, Candlelight, CCBRS, GAVO, SOWDA, SOWRAG, SOYDAVO, TASCOW, WAAPO & WORDA). Wuxuu ka shaqeeyaa Gobolada Maroodi-jeex iyo Togdheer.

Hannaanka Danwadaag waxa uu diiradda saaraa saddexda dhadhaar ee hoos ku qoran:

ARIMAHA
BULSHADA

ARIMAHA
DHAQAALAHA

ARIMAHA
KA QEYB
GALKA
HORUMARKA
DALKA

• Hannaankani wuxuu si laxaadle uga shaqeeyaa arrimaha bulshada gaar ahaan dadka danyarta ah waxana si toos ah uga faa'iideysta kun iyo todoba sagaashan urur (1,097) oo ah in ku dhow saddex iyo labaatan kun oo qoys (23,000) Qoysaskaasi oo tiro ahaan kor u dhaafeya boqol iyo sideed iyo soddon kun oo qof (138,000). Hannaankani wuxuu leeyahay saddex jaran jaro oo kala ah:

1. Ururrada Danwadaag (SHGs)
2. Dallado (CLAs) iyo
3. Midowga Dalladaha (Federation)

Somaliland waxa ka jira hadda:

1. 1,097 Urur oo Danwadaag ah &
2. 101 Dalladood
3. 2 Midow Dalladeed

DAN-WADAAG IYO ARIMAHA BULSHADA

Arrimaha bulshadu waa qeybta ugu mihiimsan ee ay ka shaqeeyaan xubnaha ururrada iyo dalladaha Danwadaag. Waxyaalaha arimaha bulshada laga qabto waxa ka mid ah:

- Wuxuu dhisaa awooda xubnaha ururrada Danwadaag.
- Wuxuu kordhiyaa isdhexgalka iyo wax wada qabsiga bulshada.
- Wuxuu yareeyaa qabyaalada waxana uu soo nooleyaa wadani yadda.
- Wuxuu kordhiyaa wax wada lahaanshaha xubnaha dhexdooda ah.
- Wuxuu xaliyaa khilaafaadka dhex yimaada qoyska iyo xaafada ba.
- Wuxuu soo saaraa awoodooda qarsoon ee xubin kasta oo ka mid ah ururrada Danwadaag.
- Wuxuu kor usoo qaadaa daryeelida caruurta
- Wuxuu dhisaa fahanka iyo isku-tashiga xubnaha Danwadaag.
- Wuxuu u abuuraa fursado shaqo ee xubanaha dhexdooda.

URURRADA DANWADAAG

Ururrada Danwadaag waxa aasaas u ah in ay kulmaan todobaad kasta, kana hadlaan baahiyaha qoys kasta, xaafadda iyo deegaanka ba khusaysa. Waxa kale oo loogu tala galey in ay is caawiyaan, iska war hayaan, isku xidhnaadaan si ay isugu nasteexeeyaan, u xaliyaan khilaafadka dhexdooda yaala ama qoyskooda, codkooduna meel dheer u gaadho, waayo, Inta badan dadka danyarta ah codkooda lama maqlo. Xubnaha ururrada Danwadaag waxey iska caawiyaan baahiyaha ku yimaada sida geerida, umusha, arooska, iyo raashinka ama quudinta qoyska IWM. Xubnuhu waxey sameystaan sanduuq u gaara kaasi oo ay iskaga caawiyaan baahiyaha aynu kor ku soo xusney, sanduuqaasi oo loo yaqaan Sanduuqa Gargaarka. Sida oo kale xubnuhu waxay leeyihiin sanduuq kale oo loo yaqaan Sanduuqa Dhigaalka.

URURRADA DANWADAAG & HOOYADA UMUSHA



Ururrada Danwadaag waxey caawiyeen dumar ku dhow 138,000 oo hooyo kuwaasi oo uga faa'ideysta si toos ah hannaankan. Waxa intaasi dheer urur waliba oo ka mid ah Hannaanka Danwadaag dhexdiisa wuxuu leeyahay xeerar iyo habab u gaara oo ay isku caawiyaan, halka dallad ahaanna ay xidhiidho dhow oo dhanka waxqabadyada bulshada ah ay ugu xidhaan hayadaha kale ee ku howlan horumarka bulshada, sida, hooyada inay u gudbiyaan goobaha xannanada caafimaadka.

Ururinta Raashinka & Quudinta Dadka Jilicdasan



Inta badan ururrada Danwadaag waxey sameeyaan barnaamijka ururinta raashinka dhexdooda iyaga oo siiya Qoysaska aan helin cunnada, waxa ay raashinkaasi u qeybiyaan dadka da'da ah ama jilicdasan ee xaafadahooda ku nool. Inta badan xubnuhu waxey iska qaadaan nus kiiloo bariis ah ama baasto ah ama daqiiq

ah. Xubin iyaga ka mida ayaa u haysa tiro ahaana waa la qoraa wixii la soo ururiyey, qoysaska iyo inta baxdey. Iyagoo tixgelinta siinaya tixraacyada ay helaan.

DANWADAAG & CAAWINTA BUKAANKA



Xubnaha ururrada Danwadaag waxey dhexdooda iska caawiyeen bukaanka iyo umusha. Xubnahaasi waa uu kala duwan yahay xanuunadoodu balse xubnuhu iyagoo mar walba diiradda ku haya Sanduuqa Gargaar, waxay wixii awoodooda ka baxsan u gudbiyaan dallada, oo iyadu door weyn ka ciyaarta isku-xidhka bukaanka iyo goobaha caafimaadka, mise na shaqada arrimaha bulshada xil weyn iska saarta. Xubnaha ururrada Danwadaag iyo dalladuhu waxay u wada shaqeeyaan si dhow oo raalli gelinaysa labadooda ba.

URURRADA DANWADAAG & GANACSIGA



Xubnaha ururrada Danwadaag waxay ay awoodda saaraan in xubin kasta ay yeelato ganacsi u gaar ah iyada, oo ay awoodda ku saarto inay ku kafaalo-qaaddo qoyskeeda. Sida oo kale xubin kasta marka ay ganacsiga billaabayso waxay awood u leedahay inay maalgelin ka qaadato ururkeeda, sida oo kale si dhibyar u bixiso deynka maalgelintaas, tan ayaa ah sababta ka dambaysa dhigaalka toddobaadleha ah ee ururrada Danwadaag.

DANWADAAG & ARIMAHA WAXBARASHADA

Xubnaha Ururrada Danwadaag waxa lagu dhiirrigaliyaa waxbarashada diiniga ah iyo ta maadiga ah labada ba gaar ahaan hooyada iyo carruurteeda. Haween weynaha xubnaha ka ah hannaanka Danwadaag waxa lagu dhiiri galiyaa wax akhriska iyo qoraalka madaama ay ganacsiyo kala duwan leeyihiin una baahan yihiin

wax qorista iyo akhrisba.

- 28,120 carruur ah ayaa illa hadda la geeyey dugsiyada kuwaasi oo iskugu jirey qaar laga soo eryey iyo kuwo dhaqaale ahaan iska bixin kari waayey
- 8,950 carruura waxay u soo iibiyeen agabkii dugsiga oo dhameys tiran, sida direyska, buugaagta...iwm.
- Dalladaha Danwadaag waxay gunnada macallimiinta dugsiyada uga soo qaadaan wasaaradda waxbarashada.
- 3, Dalladood oo ka mid ah dalladaha Danwadaag ayaa waxay si dhow ula shaqeeyaan hayado ay ka mid tahay hayadda SOS.

DANWADAAG & ARIMAHA CAAFIMAADKA



Hannaanka wuxuu sidoo kale si weyn uga shaqeeyaa arimaha caafimaadka siiba hooyada iyo dhallaanka. Waxa qabsoomey;

- Dalladaha Danwadaag waxay qalabkii xannaanada caafimaadka u soo weydiiyeen Wasaaradda Caafimaadka oo hadda u shaqeeya.
- Xaafadaha ay ka shaqeeyaan Dalladaha Danwadaag, waxay fursad u heleen ka dib markii ay Wasaaradda Caafimaadka u ta geen in la siiyo dhulkii laga dhisi lahaa Xannaanada Hooyada iyo dhallaanka.
- 125,000 oo carruur ah ayaa waxay heleen adeeg caafimaad
- 10,910 hooyo ayaa helay adeeg caafimaad oo dhamaystiran.
- 3,910 hooyo ayaa ku dhalay goob caafimaad.
- Dalladaha Danwadaag iyagoo ka faaiideysanaya guddida wacyigelinta waxa ay sameeyaan olole xaafadeed oo dhanka na daafadda iyo saxadda caafimaadka ah, sida oo kale kaga hadlaan faa'iidada ku jirta Xannaanada hooyada iyo dhallaanka.

DANWADAAG & DHOWRISTA DEEGAANKA

Hannaanka Ururada Danwadaag wuxuu ka soo horjeedaa xaalufin ta deegaanka iyo afooyinka lagu hayo isaga oo taageersan dee gaan badqaba oo ay dad iyo xoolaba ku noolaan karaan. Ururrada Danwadaag sida ay uga shaqeeyaan waxa ka mid ah:-

- Wuxuu ku dhiiri galiyaa xubnaha ururrada in ay ka ganacasadaan iibinta qaar ka mid ah dhirta loo adeegsado dib-u-dhiraynta.
- Waxay xubnaha ururradu sameeyaan olole nadaafadeed.
- Wuxuu ku dhiiri galiyaa da'yarta iney dhawraan deegaanka bilicdiisa.

DANWADAAG & WACYI GALINTA BULSHADA



Xubnaha Ururada Danwadaag ee Dalladahu waxa ay leeyihiin guddiga wacyi galinta iyo ka qeyb galka kuwaasi oo ka wacyi galiya bulshada dhaqamada xun xun.

Ololayaasha wacyi galineed ee ay sameeyaan waxa ka mida ah;

- Ololaha wacyi galinta nabadgalyada.
- Ololaha wacyi galinta dagaalka dhalinyarada iyo is kooxeysiga.
- Ololaha wacyi galinta tahriibka.
- Ololaha wacyi galinta cidhib tirka Gudniinka Hablaha iyo Tacad diyada ka dhanka ah carruurta.
- Ololaha wacyi galinta guurka degdega ah.
- Ololaha wacyi galinta nadaafada oo todobaadle ah.
- Ololaha wacyi galinta dhawrista xaquuqda dumarka iyo carruur ta.
- Ololaha wacyi galinta faa'iidada waxbarashda.
- Ololaha wacyi galinta hooyada iyo dhallaanka.

***“Hannaanka Dan-Wadaag Wuxuu Qeyb Laxaadle
Ka Qaataa Kobaca Dhaqaalaha Ee Dalkeena, Iyo
Cidhib Tirka Faqriga Dadkeena Wuxuuna Mudan
Yahay In Lala Shaqeeyo”***

DAN-WADAAG & XUQUUQDA CARRUURTA

Hannaanka Ururada Danwadaag wuxuu ilaaliyaa oo uu dhowraa xaquuqda carruurta isaga oo ay xubnaha ururrada ku jiraa qaateen tobabarro ku

saabsan daryeelka iyo waajibaaka ilaalinta xuquuqda carruurta. Waxa sidoo kale tobabarro lagu siiyey dhawrista xuquuqda carruurta maamulayaasha ururada ka shaqeeya Hannaanka Danwadaag iyo sidoo kale qaar ka mid ah ururada Danwadaag. Arimaha kor ku xusani waxey keeneen in qaar ka mid ah ururrada Danwadaag ay u sameeyaan sanduuq u gaar ah carruurta kaasi oo laga daryeelo baahiyaha carruurta.

Sidoo kale Dalladaha Danwadaag waxey ka shaqeeyaan ilaalinta iyo daryeelista carruurta, waxa ka mid waxqabadkooda;


- Ku xidhiista carruurta dugsiyada kala duwan ee gobolka si bilaash ah.
- Ku xidhiista goobaha caafimaad carruurta bukoota si bilaash ah.
- Ku xidhiista cusbitaallada carruurta laxaadka la’ iyo kuwa dhimirka ka xanuunsanaya ba.
- Ka wacyi-gelinta wax kasta oo dhaqanka ka baxsan sida lebiska foosha xun iyo socod xumada.
- U adeegsita hablaha iyo ku wacyigelinta hooyada dhibka iyo cawaaqibka ka imaan kara Gudniinka Hablaha.
- Waxay u helaan carruurtooda goobaha barbaarinta carruurta.

“Dalladaha Danwadaag, waxay carruurta xubnha ururrada Danwadaag u soo heleen dugsi loogu talogaley carruurta oo keliya oo ah fasalka 1’aad illa 8’aad kasoo bilaash u ah”

DAN-WADAAG & BIYAHA

Ururrada Danwadaag dhamaantood baahida koobaad ee ay sheegaan waa helida biyo nadiifa oo qasabadeed. Taasoo ay u arkaan iney biyuhu yihiin laf-dhabarka noolaha gaar ahaan qoyska. Biyaha inta badan waxa laga siiyaa lacag badan oo ayna awoodi karin taasi oo qeyb ka mid ah dakhligooda ay ku isticmaalaan helida biyo nadiif ah. Ururrada Danwadaag waxey ka qabteen arimaha biyaha qodobadan soo socda;

- Waxey xidhiidh toos ah la sameeyeen wakaalada biyaha ee hargeysa si ay u helaan biyo nadiif ah.
- Wakaalada biyuhu waxey usoo galisey xaafado ka mid ah biyo nadiifa oo qasabadeed laakiin la helo uun wakhtiga guga.
- Waxey qodeen hal ceel oo ku yaala tuulada beer taasoo xubnaha Danwadaag ay ka cabaan.
- Waxey xidhiidh toos ah la sameeyaan hayada wadaniga ah, kuwa caalamiga iyo kuwa kheyrigaba ah si ay uhelaan biyo nadiifa, kuwaasoo ugu deeqa foostooyin biyo ah.




DAN-WADAAG & ABAARAHA

Intii uu socday, hannaanka Danwadaag, ururrada Danwadaag waxay qeyb libaaxle ka qaateen taakuleynta dadkii abaaruhu wax ku yeeleeyeen dhammaan dalka. Waxey sameeyaan olole dhaqaale raadineed iyaga oo ka bilaabay xubnaha ururradooda iyo dalladhooda waxeyna inta badan iska soo ururiyaan wixii ay u jari karayeen ama awoodooda dhaqaale, sidoo kale waxey u soo dhexmareen deegannadii ay daganaayeen iyo cid kasta oo ay bidayeen iney wax ku dhaanto.

Ka dib, waxey ugu mariyeen deeqdii guddiyada xaafadaha oo ururinayey dhaqaalaha taakuleynta abaaraha siiba guddidii loo magacaabay guddiga abaaraha.

Taakuleyntii ay kaga qeyb qaateen arrimaha abaaraha waxa ka mid ah;

- 350 gadbodood oo bariis ah
- 250 gadbodood oo sonkor ah
- 80 kartoon oo saliid ah
- 40 buste oo kuwa labada nafar ah
- 20 buste oo kuwa nafarka ah
- 10 kartoon oo baasto ah
- 10 tanag oo timir ah
- Dharka caruurta iyo koodhadh.



DAN-WADAAG & DHAQAALAHA

Hannaanka Danwadaag wuxu abuurey saaxad ay dadka danyarti ihi ku soo bandhigi karaan awoodooda iyaga oo isku tashadey oo wax wada qabsan kara. Hadda waxey haystaan ganacsiyo shakhsi ah oo xubnaha urruradu ay samaystaan ka dib markay helaan maalgelinta ka soo baxda Sanduuqa Dhigaalka oo todobaadle ah. Sida oo kale waxa jira ganacsiyo dalladaha Danwadaag ay samaystaan si ay ugu daboolaan shaqada iyo kharashaadka dallada ku shaqaynayso balse cid kale oo hal shillin ugu dartey ma jirto ka dawlada ahaan iyo hayad ahaan ba.

Shaqo Abuurka

Hanankani waxa uu qeyb laxaad leh ka qatey shaqo la'aanta dalka isaga oo abuurey in ka badan;

- 9320 oo shaqo kuwaasi oo sugan oo la soo taaban karo
- 100 shaqo ayuu abuuraa todobaad walba
- 500 oo ganacsi ayuu xoojigaa todobaad walba.

Noocyada shaqooyinka xubnaha Danwadaag way fara badan yihiin waxayna inta badan ku xidhan tahay xubinta iyo fikirkeeda ama awoodeeda shaqo ee ay iyadu la timid.

Shaqooyinkaasi waxa ugu badan kuwan hoos ku taxan;

Tobanka shaqo ee ugu badan ururrada Danwadaag

- Dumar ah khudradley
- Dumar ah muusley
- Dumar ah xawaashley
- Dumar haysta tukaano
- Dumar ah haaftoley
- Dumar waxey naaxiyaan xoolaha
- Dumar ah hiliblayaal
- Dumar ah bagaashlayaal
- Dumar ah caanaley
- Dumar ah dawaarley



ILAHA DHAQAALAH E URURRADA DANWADAAG

Meelaha kala duwan ee ururrada Danwadaag lacagtu ka soo gasho si ay ganacsi shakhsi ah xubin kasta u samaysto waxa ka mid ah:-

- Lacagta laga qaado xubinta cusub ee ku soo biira ururka.
- Lacagta dhigaalka todobaadleha ah.
- Lacagta faa'iidada maalgalinta xubnaha ee mudaraba musharaka.
- Lacagta ganaaxa ee xubnaha ku maqnaada bilaa cudur-daar.
- Lacagta shaqo wada jir ah ka soo gasha ururka.

LACAGTA MAALGALINTA URURRADA DANWADAAG



Lacagta maaligalinta ururada Danwadaag waxay ka timaada lacagta dhigaalka ah iyo soo celinta maalgelinnada maqan. Xubnuhu waa ay ku kala duwan yihiin, se celcelis ahaan ururrada Danwadaag waxa ay sameeyaan dhigaal tobaadle u ah 10,000 illa 15,000 oo Shillinka Somaliland ah.

- Ka dib dhigaalka ururrada Danwadaag ee Todobaad kasta ah Inta badan xubnuhu waxey qaataan qadar lacag ah oo u dhaxeysa 300,000 ilaa 1,000,000 sl.sh taasoo ah wakhtiga hore ama wareega koobaad ee ay ururadu cusub yihiin.
- Maanta ururrada Danwadaag ee jira hal sanno iyo wax ka badan todobaadkiiba waxa la maal galiyaa 5 xubnood oo ah xubnaha ururrada.

DANWADAAG & CASHUUR BIXINTA

Hannaanka Danwadaag wuxuu cashuur ahaa soo galiyaa dawlada hoose dakhliga soo ku xusan;

- Maalintiiba cashuur dhan 20,000,000 sl.sh
- Bishiina cashuur dhan 600,000,000 sl.sh
- Sanadkiina cashuur dhan 7,200,000,000 sl.sh



Danwadaag & Ka Qeyb Galka Horumarka Dalka



Hannaanka Ururada Danwadaag mid ka mid ah waajibaadkiisa ayaaa ah ka qeyb galka arimaha bulshada iyo horumarintooda. Maadama oo dadka danyarta ah codkoodu meel dheer gaad-heyntin. Maanta xubnaha ururrada Danwadaag ku jira waxey la shaqeeyaan guddiyada xaafadaha, iyo wasaaradaha, iyagoo garab ku siiya arimaha u baahan in wax laga qabto xaafad ahaan iyo degmo ahaan ba. Waxa ay sidoo kale si dhow ula shaqeeyaan guddiyada nabad galyada, waxbarashda, caafimaadka, waddooyinka, nadaafadda. iwm.

Waxyaalihii ilaa maanta ka qabsoomey tiirka saddexaad ee hannaanka Danwadaag waxa ka mid ah;

- In dallad kasta ku leedahay guddiyada xaafadda xubno si dhow ula shaqeeya.
- Xubno ka mid ah ururrada iyo dalladaha Danwadaag ayaa ah Gudoomiyeyaasha xaafadda.
- Waxay dalladaha Danwadaag si dhow ula shaqeeyaan
- Guddiga nabad galyada ee deegaannadooda
- Guddiga horumarinta ee deegaannadooda
- Guddiga caafimaadka ee deegaannadooda
- Guddiga waxbarashada ee deegaannadooda
- Guddiga la dagaanka caadooyinka xun xun
- Guddida wacyigelinta iyo ka shaqaynta nadaafadda deegaannadooda

XAAFADAHA UU KA SHAQEEYO HANNAANKA DANWADAAG

MAROODI JEEH

- Aw-aden
- Ayaxa 1, 2, 3 iyo 4 (IDPs)
- Badhka
- Cakaara
- Calaamadaha
- Daami A iyo Daami B (IDPs)
- Dhagosayn
- Mooge A, iyo Mooge B (IDPs)
- Jungalka
- Gantaalaha
- Jimcaale
- Naasa hablood A iyo B (IDPs)
- Isha Borama
- Macalin Haroun
- Masalaha
- Maxamud Haybe
- Mohamed Mooge
- Muuq dheer
- State house
- Digaale
- Sheikh Nuur
- Stadium
- Qoob dameeraad

TOGDHEER

- Caaqibo
- Caaqil yare
- Koosar
- October
- Ileyska Togdheer
- Macalimiinta
- Shacabka,
- Saylada
- Yerowe
- Beer

DEGMADA
31 KA MAY

DEGMADA
MOHAMUD
HAYBE

DEGMADA
MACALLIN
HARUUN

DEGMADA
GACAN
LIBAAX

DEGMADA
AXMED
DHAGAX

DEGMADA
IBRAAHIM
KOODBUUR

